

Good To Go!™

SHURUUDAHA IYO XEERARKA QOFKA LEH AKOONKA

SHURUUDAHAAN IYO XEERARKAAN WAXAY QAYB KA YIHIIN WAAXDA GAADIIDKA GOBALKA WASHINGTON
(WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF TRANSPORTATION HESHIISKA MACMILKA (HESHIISKA)
Good To Go!. MAJIRTO WAX KU QORAN HESHIISKA OO KAA DHAAFAYA, MACMIL KA AHAAN, GANAAXYADA KA DHASHA U HOGAANSANAAN
LAAANTA SHARCIYADA IYO XEERARKA GOBALKA WASHINGTON.

Nooca 10 aad

Marka aad furanayso akoonka **Good To Go!** waxaad aqbalaysaa inaad raacayso shuruudaha iyo xeerarka soo socda:

1.0 Kharashaadka iyo Lacaha lagu bixiyo boonada baabuurta

1.1 Isticmaalka Akoonka

Akoonkaaga **Good To Go!** waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo lacagta boonada ayadoo la adeegsanaayo midkood habka lacag bixinta **Good To Go!** ama Habka Lacag bixinta La adeegsado Taarikada gaariga (Pay By Plate) haddii la heli karo.

1.2 Kharashaadka

Kharashaadka boonada gaariga way kala duwanaa karaan ayadoo ku xiran habka lacagta loo bixinaayo iyo mid iyo in kasii badan oo kamid ah arrimahaan soo socda:

- 1) Tirada candhada gaariga ee la mashiinku sheego;
- 2) Waqtiga iyo taariikhda gaariga soconaa;
- 3) Goobta lagu bixinaayo kharashka boonada gaariga
- 4) In gaariga yahay gaari la wada raaci karo ama inuusan ahayn iyo/ama;
- 5) In gaarigu uu si sax ah usoo daabacday boonada lagu gudbiyo ee **Good To Go!** iyo in kale.

1.3 Lacagta akoonka ku jirta oo yar

Haddii lacagta kajirta akoonkaaga ka hoos marto ebar gaarigana loo soo saaro kharashka boonada ee Pay By Mail, kharashka waxaa lagu dari doonaa bayaanada kharashka ee bilaha ah, oo loo diri doono ciwaanka qofka leh akoonka **Good To Go!** ee ku qoran faylka. Haddii kharashaadka boonada an la bixin, Ogeysiis Ganaax oo Madani ah ayaa loo diri doonaa qofka gaariga ku diiwaangashan inuu leeyahay. Waxaa lagu ganaaxi karaa kharashaad dheeraad ah iyo ayadoo lagu saleynayo shuruudahaan soo socda:

- 1) Haddii aad doorato dookha Kharashka Hordhaca ah (Pre-Paid) si aad iskaga bixiso kharashka akoonkaaga **Good To Go!** aysan kuugu jirin lacag ku filan inaad iskaga bixiso kharashka boonada, waxaad bixin doontaa kharash lagu saleynaayo qiimaha Pay By Mail.
- 2) Haddii aad isticmaasho dookha Bixi Markaad marayso (Pay As You Go) aadna lacagta ku bixin wayso habka lacag bixinta ee ad dooratay, waxaad bixin doontaa kharash lagu saleynaayo qiimaha Ku bixi Boostada Fadlan si joogto ah u akhri bayaanada kharashkaaga ee bilaha ah iyo xogta akoonka si aad iskaga ilaaliso kharashaad dheeraad ama ganaaxyo.

2.0 Xogta Akoonka

2.1 Akoon Wax walba u toosan yihiin

Si wax walba oo I xariira akoonkaaga aad u toosiso, waa in;

- 1) Akoonkaagu ay kujirto lacaga fican haddii habka lacag bixinta akoonka uu yahay nidaam lacag bixinta hordhaca ah;
- 2) Mar walba ay diyaar tahay habka aad lacagta u bixiso;
- 3) Xogta meelaha lagaala soo xariiraayo, ciwaanka boostada, iimaylka, taleefoon lambark ay yihiin kuwii kugu dambeeyay ayna yihiin kuwa ku qoran akoonka **Good To Go!** iyo Department of Licensing, madaama **Good To Go!** uu yahay nidaam ka duwn kana Department of Licensing;
- 4) Xogta gaarigaaga oo ay kujiraan sanadka, shirkada sameysay, nooca uu yahay, lambarka taarikada, lambarka boonada ay yihiin kuwii ugu danbeeyay, iyo;
- 5) Si isku xigxigta u akhrido baynka kharashka ee akoonka iyo xogta akoonka si aad u hubiso in wax kasta ay yihiin sidii loogu talagalay.

2.2 Xirista akoonka

Waxaad codsan kartaa in akoonkaaga la xiro. Marka aad bixiso dhammaan kharashaadka gaariga ee kugu harsanaa, iyo/ama ganaaxyada madaniga ah, lacag kasta oo akoonka ku hartay dib ayaa laguugu soo celin doonaa.

2.3 Lacag celinada

Lacagaha I celinayo waxaa dib loogu celin doonaa habkii markii hore lagu bixiyay marka ay macquul tahay, marka la xaqiijiso in dhammaan lacagaha gaariga, kharashaadka lagu leeyahay, iyo/ama ganaaxyada ka dhasha boonooyinka in la bixiyaya. Akoonada aan diiwaangashaneyn uma qalmaan in lacag dib loogu celiyo.

3.0 Dookhyada Lacag Bixinta

3.1 Dookha Lacaga bixinta ee Ootamaatiga ah

Waxaa jira labo dookh oo ay heli karaan macaamiisha doonaaya inay lacag boonadooda ku bixiyaan qaab ootamaatiga ah;

- 1) **Habka Lacag bixinta Hordhaca ah**
Lacag bixinta hordhaca ah waxaa laga doonayaa inaad geliso lacag dhan ugu yaran \$30 akoonkaag si loogu daboolo kharashaadka boonooyinka iyo kharash kasta oo ka dhasha boono aad rabto inaad mustaqbalka iibsato. Marka lacagta kujirta akoonkaaga ay yaraato, akoonkaaga waxaa soo geli doonaa lacag ootamaatig ah oo ka imaansay habka lacag bixinta ee aad daaratay. Ama waxaad dooran kartaa maalmo gaar ah oo bisha ka mid ah inaad dib u buuxiso lacagta ku jirta akoonkaaga adoo

adeegsanaaya jeega elektarooniga ah. Fadlan xaqiiji inaad doorato lacag ku filan oo aad ku dabooli karto kharashka boonada aad adeegsan doonto waqtiyada u dhaxeeya mararka aad akoonka lacagta ku shubto si aad iskaga ilaaliso in lagu soo diro boosto lagaaga dalbaanaayo inaad kharashka ku bixiso. Haddii aad u baahan tahay, qaab toos ah ayaa akoonkaag lacag ugu shubi kartaa inta u dhaxeysa taariikhda aad lacagta ku shubto.

2) Kharash bixinta hadba inta aad isticmaasho

Lagaama doonaayo haraadiga lacag bixinta hordhaca ah. Kadib marka aad gaarigaaga kaxeysato, kharashka boonada gaariga waxaa si ootamaatiga ah looga jaran doona kaarkaaga kaashka labo jeer bishii. Fadlan xaqiiji in habka aad lacagta ku bixiso inaysan waxba k qaldaneyn si aad iskaga ilaaliso in lagu soo diro codsi kharash bixin oo lagu bixinayo boostada.

3.2 Dib u buuxinta Akoonka

Lacagta ugu yar ee lagaa doonaayo inay akoonka kujirto wa \$30 si lacag ootamaatiga ah usoo gasho akoonka. Ayadoo ku xiran isticmaalkaaga boonada, waxaad dooran kartaa in lacag badan ay soo gasho akoonka kuna soo gelaya qaab ootamaatig ah. Haddii aad diyaaris lacag bixinta ootamaatiga ah, waxaad aqbashay arrimahaan soo socda:

1) Nooca Lacag Bixinta

Waxaad bixin doontaa oggolaansho iyo macluumaadka lagama maarmaanka ah si aad u diyaariso lacag bixin ootamaatig ah oo ayadoo la adeegsanaayo kaarka kaashka, kaarka deynta, ama jeega elektarooniga ah (Automated Clearing House, ACH).

2) Diidida Lacag bixinta

Haddii baankaagu diido lacag bixintaada, akoonkaaga waxaa laga yabaa in laga dhigo akoon lacagta loogu shubi karo qaab toos ah. Waxaad xogtaada lacag bixinta ka cusbooneysiin kartaa oonleenka si aad dib mar labaad ugu diyaaris lacag bixinta ootamaatiga ah.

3) Dib usoo celinta lacagta iyo Kharashaadka Su'aasha ka timaaday

Haddii xarunta adeegga macmiilka ay hesho ogaysiis xad-dhaaf ah oo ku saabsan khilaaf ka jira kaarka kaashka ama khilaafka jeega elektarooniga ah (ACH) ee keena dib usoo celint lacagta (dib ugu celinta lacagta kaarka) ama lacag bixinada su'aashu ka taagan tahay, qofka akoonka leh waxaa laga yabaa in looga baahdo inuu ku buuxiyo akoonkiisa lacag la xaqiijiyay ama lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka. Haddi aad su'aal ka keento lacagaha lagu bixiyo habkaaga lacag bixinta, adiga ayaa wali ka masuul ah inaad bixiso kharashka boonooyinka. Qaab kaliya ee su'aal looga keeni karo kharashka boonooyinka waa in loo maro nidaamka khilaafka ee **Good To Go!** sida lagu xusay qaybta 4.0.

4) Lacagaha Akoonka ee Yar (NSF)

Haddii baanku soo celiyo jeega maadm akoonka ay kujirto lacag yar, kharashka aan kugu filnayn (non-sufficient funds (NSF) oo ah \$30 ayaa lagu dalaci doonaa akoonka. Qofka akoonka iska leh waxa looga baahan karaa inuu akoonka ku shubo lacag la xaqiijiyay am lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka.

3.3 Lacag Ku shubida Akoonka ee Tooska ah

Lacagta ugu yar ee lagaa doonaayo inay akoonka kujirto waa \$30. Haddii aad diyaariso lacag bixinta tooska ah, waxaad aqbashay arrimahaan soo socda:

1) Nooca Lacag Bixinta

Waxaad isticmaali kartaa kaarka kaashka ama kaarka deynta, jeega elektarooniga ah (ACH), jeeg, dalab lacag, ama lacag cadaan ah. Fadlan lacag haku soo dirin boosto. Xarunta adeegga macmiilka waxay xaq u leedahay inay diido jeegaga kumeel gaarka ah.

2) Dib usoo celinta lacagta iyo Kharashaadka Su'aasha ka timaaday

Haddii xarunta adeegga macmiilka ay hesho ogaysiis xad-dhaaf ah oo ku saabsan khilaaf ka jira kaarka kaashka ama khilaafka jeega elektarooniga ah (ACH) ee keena dib usoo celint lacagta (dib ugu celinta lacagta kaarka) ama lacag bixinada su'aashu ka taagan tahay, qofka akoonka leh waxaa laga yabaa in looga baahdo inuu ku buuxiyo akoonkiisa lacag la xaqiijiyay ama lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka. Haddi aad su'aal ka keento lacagaha lagu bixiyo habkaaga lacag bixinta, adiga ayaa wali ka masuul ah inaad bixiso kharashka boonooyinka. Qaab kaliya ee su'aal looga keeni karo kharashka boonooyinka waa in loo maro nidaamka khilaafka ee **Good To Go!** sida lagu xusay qaybta 4.0.

3) Lacagaha Akoonka ee Yar (NSF)

Haddii baanku soo celiyo jeega maadm akoonka ay kujirto lacag yar, kharashka aan kugu filnayn (non-sufficient funds (NSF) oo ah \$30 ayaa lagu dalaci doonaa akoonka. Qofka akoonka iska leh waxa looga baahan karaa inuu akoonka ku shubo lacag la xaqiijiyay am lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka.

4.0 Khilaafta

Waxaad su'aal ka keeni kartaa kharashaadka iyo lacaga boonooyinka ee laga jartay akoonkaaga oonleenka www.mygoodtogo.com ama kadib marka lala xariiray xarunta adeegga macmiisha ee **Good To Go!** inta xiliga lacagta la jartay aan laga soo wareegin wax ka badan 60 maalmood. Haddii lacagta boonada ama kharashka meesha laga saaray ama wax laga badelay, akoonkaaga ayaa lacag lagu shubayaa.

5.0 Good To Go! Isticmaalka Boonada gaariga

Waxaad isticmaali kartaa boonadaada gaariga ee shaqeyneysa **Good To Go!** adoo adeegsanaaya akoon uun ah **Good To Go!** marka aad joogto xarunta lagu bixiyo kharashka boonda.

5.1 Rakibida

Waxaad aqbashay in si sax ah loo rakibo, loo dhejiso, looga shaqeysiiyo iyo in si sax loo isticmaalo boonada sida ku xusan tilmaamaha baakada. Marka la rakibo baaska gaariga, waa inaan marna la fujiin si uu usii wado in qaab fiican u shaqeeyo.

5.2 Risiityada

Waad fahantay oo oggolaatay inaad heli doonin risiityada boonada ee shaqsiyaadka laakiin laga yaabo inaad aragto xogta kharashaadka aad bixisay marka aad gasho akoonkaaga www.mygoodtogo.com.

5.3 Dib u buuxinta akoonka

Haddii aad u baahan tahay inaad badesho kaarkaaga sabab kastaba ha jirtee, waxaa laga yaabaa in lagu soo dalaco kharash lagu badelaayo. Haddii xarunta adeegga macmiilka ay ogto in kaarkaagu leeyahay cilad, kaarka waxaa lagu badeli karaa qaab bilaash saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la iibsaday. Haddii kaarkaagu kaa lumo ama lagaa xado, waa inaad isla markiiba ogeysiisaa xarunta adeegga macmiilka maadaama aad masuul ka noqonayso dhammaan kharashyada la galo marka ogeysiiska la helo.

5.4 Boonada ay ku gudbaan Mootooyinka

Boonada mootada waa in loo adeegsado mootada kaliya. Rakibid iyo isticmaalka boonada mootada ee loo adeegsado baabuur aan ahayn mooto waxaa ka dhalan doona in la joojiyo shaqada boonda iyo/ama ganaa lacag bixinta ah sida lagu qeexay RCW 46.61.690.

6.0 Boonada Dib loogu Noqdo

6.1 Boonooyinka Laga iibsado Good To Go!

Boonooyinka sida tooska ah looga iibsado **Good To Go!** ee buuxiya shuruudahaan soo socda waxaa lagu soo celin karaa kaarka kaashka lixdan (60) maalmood gudahood oo laga bilaabaayo taariikhda iibka:

- 1) Boonada waa in lasoo celiyo ayadoo cusub, aan la isticmaalin, kuna jirta xaalad lagu iibin karo
- 2) Boonada waa inaan loo isticmaalin xarunta boonooyinka
- 3) Boonada Flex waa in lal soo celiyo koolooyinka iyo xajiyaasha
- 4) Boonada taarikada ruqsada waa in lagu soo celiyaa sanduusiil aalka ahaa oo ay la socdaan birta afka qaloocan iyo musbaarka.

6.2 Boonooyinka laga iibsaday Dukaamada Tafaariikhleyda ah

Boonooyinka sida toos ah looga soo celiin karaa dukaamada tafaariikhleyda ah waxaa laga yaabaa inaan lagu soo celin kabin **Good To Go!** marka la adeegsado kaarka kaashka waana in lagu celiyaa dukaanka tafaariikhleyda sida ku xusan siyaasada dib usoo celinta.

7.0 Qiimo dhimisay iyo Dhaaftaanada

Si aad u hesho qiimo dhimis ama dhaaftaanada xarumaha lagu bixiyo kharashka boond, akoonkaaga waa inuu yahay mid wax walb u saxan yihiin waana inaad buuxisaa shuruudaha sida uu qabo Guddiga Gaadiidka Gobolka Washington. Waa inaad sidoo kale ku rakibtaa boonada loo qoondeeyay qiimo dhimista ama dhaaftaanka kharashka (tusaale waa inaad haysataa Boonada Flex si aad u hesho dhaaftaank kharashka baabuurta). Siyaasadaha dhaaftaanka ee hadda waxaa laga heli karaa <https://www.wsdot.wa.gov/GoodToGo/carpool.htm>.

8.0 Lacag bixinta La adeegsado Taarikada

Haddii aanad haysan boono, ama haddii boonadaadu uusan mashiinku sheegin, nidaamkeena lacag bixinta sawirku waxa uu qaadi doonaa sawirada taarikada gaarigaaga. Haddii lambarka taarikada uu ku qoran yahay akoonkaaga, kharashka waxa lagu jaran doonaa nidaamka lacag bixinta ee la adeegsado taarikada ayadoo kharashka ugu habboon laga jaraayo akoonkaaga. Lacag bixinta fudud ee la adeegsado taarikaga gariga ee ah 25 senti waxaa lagu qiimayn doonaa kharashaadka boonada lacag bixinta taarikada la adeegsado.

9.0 Joojinta

Heshiiskan waxaa joojin kara WSDOT waqti kasta iyo sabab kasta ha jirtee, oo ay kujirto, laakiin aan ku koobneyn dhaqdhaqaaq la'aanta akoonka muddo dhan 24 ama in ka badan oo isku xigta ama sababo la xariira in akoonka uusan kujirin wax lacag ah. Haddii akoonkaaga sidaas loo joojiyo sababo la xariira inaysan kujirin wax lacag ah iyo/ama lacag kast oo lagu leeyahay iyo kharashaadka waa in si buuxda loo bixiyaa isla markiiba ama waxaa laga yaabaa in akoonka la duldhigo lagu ganaax, uruurin, habraacyo iyo tallaabooyin sharci oo uu qaadayo gobolka Washington. Sidoo kale, Haddii akoonkaaga sidaas loo joojiyo, xarunta adeegga macmiilka waxay soo celin doontaa lacag kasta oo kujira akoonkaaga ka dib marka la bixiyo kharashyada boonooyinka, kharashadka, iyo kharashka, iyadoo aan wadan wax lacag dulsaar ah. Wax lacag ah dib loogu celin doono akoonada aan diiwaanshaneyn.

10.0 Siyaasada Dhowrista Xogta

10.1 Isbadelada

Siyaasada Dhowrista Xogta ee **Good To Go!** waxay ku xiran tahay shuruudaha sharciga gobolka iyo kan federaalka waxaana laga yaabaa in wax laga badelo waqti kasta iyadoo la raacaayo shuruudaha sharciga ee khuseeya. Ogeysiiska isbadel kasta oo lagu sameeyo Siyaasadaan Dhowrista Xogta waxaa lagu heli karaa iimayl, bayaanka akoonkaaga iyo/ama soo gelida Xarumaha Adeegga Macmiilka. Ogeysiisyada sidoo kale waxaa lasoo gelin doonaa MyGoodToGo.com.

10.2 Shaacinta Xogta

Xogta ay soo aruuriso xarunta adeegga macmiish ee la xiriirta akoonkaaga lama shaacin doono marka laga reebo xaaladaha soo socda:

- 1) Marka aad codsato sida qof leh akoonkaaga leh aqoonsi habboon.
- 2) Marka ay lagama maarmaanka yihiin si loogu adeegsado uruurinta lacagaha boonada ee aan la bixin, kharashaadka iyo ganaaxyada.
- 3) Marka lala wadaagyo hay'adaha fulinta sharciga si loogu adeegsado ujeedooyin kale kaliya haddii codsiga uu la socdo amar maxkamadeed.
- 4) Marka uu sidoo kale sharcigu codsado.

11.0 Kharashaadka Maamulka

Kharashaadka maamulka waxaa lagu saleyn karaa xaaladaha soo socda:

11.1 Bayaanka Akoonka ee Bilaha ah

Nuquulo waraago ah oo bayaankaaga bilaha ah ayaa lagu soo diri karaa boostada. Waxaa jira lacag lagaaga qaadayo daabacaada iyo boostada oo ah 50 senti boggiiba (kharashka ugu yar ee boggiiba la qaadi karo waa \$1.50). Bayaanaada bilaha ah sidoo kale waxaa lagu heli karaa oonleenka ama iimayl ayadoon wax lacag ah lagaaga qaadeen.

11.2 Kharashkaadka Dib u Daabacaada Bayaanka akoonka

Bayaanaada baanka ee warqadaha ah waxaa laga heli karaa xarumaha adeegga macmiilka ee **Good To Go!** Waxaa jira lacag lagaaga qadaayo dib u daabacida oo ah 50 senti boggiiba (kharashka ugu yar boggiiba lagaaga qaadaayo waa \$1.50)

11.3 Lacag bixinta La adeegsado Taarikada

Kharashka lacag bixinta la adeegsado taarikada ee 25 senti waxa lagu qiimayn doonaa kharashaadka Pay By Plate waxaana laga jari doonaa akoonka **Good To Go!**

11.4 Kharashka Ka dhasha Dib ka bixinta Khidmada

Kharash dhan \$5 ayaa lagu dabaqi doonaa lacag bixin ksta haddii bixinta kharashka boonada aan la bixin marka la gaaro waqtigeed.

11.5 Kharashka Ganaaxa Madaniga ah

Kharash kasta oo lagu bixiyo boonada oo aan lagu bixin 80 maalmood gudahooda oo laga bilaabo taariikhda bixinta kharashka boonada waxa uu noqonayaa mid u qalma in lagu ganaaxo kharashka ganaxa madaniga h. Kharashka ganaaxa madaniga ah waa \$40 halkii kharash bixinb.

11.6 Xiritaanka Akoonka

Haddii akoonkaaga aanu shaqayn muddo dhan 24 ama in ka badan oo xiriir ah dhanka kalena WSDOT ay joojisay heshiiskan sida ku cad Qaybta 9 aad ee halkaan kujira, \$5 ayaa laga yaabaa in lagu dalaco lacag kasta oo akoonka kujirtana kadib marka la xiro dib ayaa loo bixin doonaa ayadoon wax dulsaar ah wadan.

11.7 Waa ay Isbadeli karaan

Khidmaduhu waa ay isbadeli karaan. Khidmadaha hadda jira iyo ogeysiiska isbadelka khidmada waxaa lasoo gelin doonaa xarumaha adeegga macmiilka, gaar ahan qoraalka akoonkaaga, iyo MyGoodToGo.com.

12.0 Isbadelada

Xarunta adeegga macmiilka waxa laga yaabaa inay hadba waqti kadib sameyso isbadelo ama inay wax ka badesho shuruudaha iyo xeerarka heshiiska. Xarunta adeegga macmiilka waxa laga yaabaa inay hadba waqti kadib sameyso isbadelo ama inay wax ka badesho shuruudaha iyo xeerarka heshiiska. Isbadelada ama wax ka badelida shuruudaha iyo xeerarka waxa lagu soo diri doonaa iimaylka gaar ahaan ciwaanka iimaylka ku qoran akoonkaaga, haddii aad bixisay, bayaanka akoonkaaga, waxaa lasoo gelin doonaa www.wsdot.gov/GoodToGo, iyo waxaa lasoo gelin doonaa Xarunta Adeegga Macmiilka.

13.0 Masuuliyada

Midkoodna WSDOT iyo xarunta adeegga macmiilka kuma lahan wax masuuliyad ah ama waajibbaad ah macmiilka marka la eego isticmaalka ama waxqabadka akoonka **Good To Go!**

Sharciga VI ee Ogeysiiska Dadwaynaha Siyaasada Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington (Washington State Department of Transportation's, WSDOT) ayaa dhigaysa inaan qofna, ayadoo la eegaayo qowmiyadda, midabkiisa, dalka uu kasoo jeedo, ama jinsiga uu yahay, sida ku xusan Sharciga VI ee Xaquuqaada Dadwaynaha ee soo baxay 1964, inaan laga reebin ka qayb galka, loona diidin gunnooyinka, ama inaan lagula kicin wax takoor ah oo ka dhan ah barnaamijka iyo hawlaha federaalka maalgeliyo. Qof kasta oo aaminsan in xaquuqiisa Sharciga VI lagu tuntay, wuxuu cabasho usoo gudbin karaa Xafiiska Fursadaha Simnaanta (Office of Equal Opportunity, OEO) ee WSDOT. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka loo gudbiyo cabashada Sharciga VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibbaadyada takoor la'aanta, fadlan kala xiriir Iskuduwaha Sharciga VI ee OEO adoo kala xariiraya (360) 705-7082.

Xogta Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) Xogtaan oo qaab kale u qoran ayaa la heli karaa kadib marka iimayl loo diro kooxda Kaladuwanaanshaha/Arrimah ADA ayadoo lagala xariirayo wsdotada@wsdot.wa.gov ama laga wacaayo lambarka bilaashka ah ee 855-362-4ADA (4232). Shaqsiyaadka dhagoolayaasha ah ama maqalku ku adag yahay waxay sameyn karaan codsi ayagoo wacaaya Washington State Relay oo ah 711.